DHAQAALAHA KU BAXA DOORASHADA SOMALILAND:
Meelehee Xisbiyada Somaliland ay ka heleen dakhliga doorashadii 2017?

Warbixin Kooban

Center for Policy Analysis (CPA)

Hargeisa, Somaliland

June 2018

CPA waa Xarun lagu gorfeeyo siyaasadda iyo arrimaha kale ee khuseeya gobolka Geeska Afrika, waxaa loo sameeyey inuu ka caawiyo wadamada gobolka dhinaca Nabadda, Dimoqraadiyadda iyo Xuquuqda Aadanaha. CPA Xarunteedu waxay ku taallaa magaalada Hargeisa, ee Caasimadda Somaliland.

Contact Information:
centerforpolicy.ed@gmail.com
http://www.centerforpolicy.net/

HORDHAC:

Intii lagu guda-jiray doorashadii madaxtinimada ee Somaliland ka qabsoontay November 13, 2017, waxaa muuqanayey lacago xad-dhaaf ah oo lagu isticmaalayo ololaha doorashada, sidoo kalena Xisbiyada ka qayb-gelayey doorashada ayaa isku eedaynayey inay jiraan lacago ka soo galay Somaliland wadamo debedda ah. Xarunta Daraasaadka Siyaasiga ah ee CPA waxay ka mid ahayd hay'adaha sida dhow ula socday ololaha doorashada, waxaana xilligaas xarunta CPA ay samaynaysay warbixino toddobaadle ah (Monitoring Reports) oo lagu soo bandhigayey hadba dhacdooyinka doorashada la xidhiidha.

Ka dib doorashadii madaxtinimadu markii ay dhacday, waxaa isla markiiba ay xarunta CPA bilawday daraasad ku saabsan, Lacagaha ku baxay doorashada, Meelaha Xisbiyadu lacagaha ka helaan, Meelaha ugu badan ee Xisbiyadu ay lacagaha ku bixiyaan, Hannaanka Maaliyadda ee Xisbiyada iyo sababaha keena in awoodda xisbiyadu ay ku soo ururaan hal koox.

HANNAANKA XOG-BAADHISTA:

Xogta aan raadinaynay waxaa gacanta ku hayey dad kooban, sidaas awgeed waxaan bartil-maameedsanay hoggaanka sare ee Xisbiyada, masuuliyiinta laamaha maaliyadda Xisbiyada ama shakhsiyaad xogogaal u ahaa lacagaha doorashada ku baxay (Snowball Sample). Muddo afar bilood ah oo aan xog ururinta wadnay waxaan waraysannay illaa 21 qof oo ay ku jiraan masuuliyiinta sarsare ee Xisbiyada sida qaar ka mida musharaxiinta ka qayb-galay doorashadii madaxtinimada, taas oo aanu xisbi walba ka waraysanay 7 xubnood.

Sidoo kale waxaan waraysanay 9 xubnood oo kale oo ka mida ururada bulshada rayidka ah, xubno ka shaqaynayey doorashada ama dad kale oo aqoon u lahaa doorashadii madaxtinimada (2017) ee Somaliland sida ay u dhacaysay. Ujeedada aan u xulanay masuuliyiinta aan waraysannay ayaa ahaa, maadaama ay yihiin dadka hayey xogta aan raadinaynay.

Ka sokow dadka aan tooska u waraysanay, waxaan kale oo siyaabo kala duwan, xog uga helnay Hay'adaha ka shaqeeya hawlaha doorashada, dad u shaqeeya hay'adaha caalamiga ah, iyo xubno kale oo muhiim u ahaa inaan la kulano.

Dadka aan waraysanay, maanaan isticmaalin magacyadooda, sababo la xidhiidha nooca xogta aan raadinaynay oo ahayd mid xasaasi ah, isla markaana ay codsadeen qaar ka mida masuuliyiinta ka qayb qaadanayey xor-ururintani inaan la shaacin.

Waxaa xusid mudan, in xog ururintani ay tahay oo keliya, natiijada ka soo baxday waraysiyada aan la yeelanay 30-ka xubnood ee aan waraysanay, hase ahaatee ay iftiiminayso in loo baahan yahay in cilmi-baadhis intan ka badan la sameeyo si loo helo xog intan ka faahfaahsan.

Xarunta CPA waxay si ka madax-banaan - dadka ay daraasaddan ku waraysatay ay - ku ogaatay inay jiraan lacago intan ka badan oo loo isticmaalay ololaha doorashada hase ahaatee saddex sababood MIDKOOD aanay noola wadaagin masuuliyiinta Xisbiyada ee aan waraysanay:

a) Xisbiyada oo aan rabin in la ogaado lacagaha kaga baxay doorashada, taas oo masuuliyiinta qaarkood ay nala wadaageen xog ka yar [sida ay ilo madaxbanaan noo sheegeen] inta Xisbigaasi u isticmaalay ololihii doorashada.
b) Xisbiga oo aan doonayn in la ogaado lacagaha uu ka helay ganacsatada taageerada u fidisay, ama lacago ka soo galay dadka Xisbiga Guushiisa ka shaqaynayey.
c) Xisbiga oo ay marar badan dhici karto inaanu xog badan ka haynin lacagaha ay isticmaalayaan ganacsatada iyo dadka kale ee guushiisa ka shaqaynaya.

Haddaba, Xarunta CPA waxay warbixintan ku soo bandhigaysaa, natiijada uga soo baxday xog ururinta ay samaysay, oo keliya.

1.1 LACAGAHA KU BAXAY DOORASHADII MADAXTINIMADA EE SOMALILAND:

Lacagaha ku baxa doorashooyinka Somaliland waxay u kala baxaan, kuwo si toosa ugu baxa hannaanka doorashada, sida qalabka doorashada, amniga, shaqaalaha ka shaqaynaya goobta doorashada iwm. Lacagtaasi waxaa kala bixiya xukuumadda Somaliland iyo Qaadhaan-bixiyayaasha taageerada u fidiya doorashooyinka Somaliland.

Lacagtaas waa mid si guud loo heli karo, hase ahaatee waxaa jira lacago kale oo tiro badan oo ku baxa doorashada Somaliland kuwaas oo aan xog badan laga hayn inta ay le'eg yihiin, lacagahaas waxaa ka mida, lacagaha ay xisbiyadu u isticmaalaan ololaha doorashada, lacagaha ay reeruhu xisbiyada ku taageeraan, lacagaha ganacsatadu xisbiyada ku taageeraan iwm. Haddaba xarunta CPA waxay isku dayday inay soo bandhigto oo keliya qaybta la ogyahay, gaar ahaan xogta ay nala wadaageen oo keliya dadka aan waraysanay, waxaase jiraya qaybo badan oo aan illaa haatan la ogayn inta ay le'eg yihiin.

Si guud lacagaha ku baxa doorashooyinka Somaliland waxay u qaybsamaan afar qaybood oo waaweyn kuwaas oo kala ah:

a) **KHARASH SI TOOSA UGU BAXA DOORASHADA**, taas oo gasha hawlaha farsamo, waxaana inta badan kharashkaas uu ka yimaadda Xukuumadda Somaliland iyo Qaadhaan bixiyayaasha. Sida uu sheegay Madaxweynaha Somaliland Muuse Biixi Cabdi oo la hadlay labada gole baarlamaan ee Somaliland, ayaa sheegay in lacagta ku baxday doorashadii Somaliland ee qabsoontay November 13, 2017 inay ahayd $24 Milyan, taas oo 54% ay ka timi Xukuumadda Somaliland oo dhigmaysa $13 Million halka 46% ay ka timi beesha Caalamka oo u dhigmaysa $11 Million.

b) **LACAGAHA SOO GALA XISBIYADA QARANKA EE AY U ISTICMAALAAN HAWLAHA DOORASHADA**. Xog sugan lagama hayo inta ay le'eg tahay lacagtaasi, sidoo kale ma jirto xisaab-celin furan oo ay Xarunta CPA aragtay ama ogaatay oo la xidhiidha xisaab celinta maaliyadda Xisbiyada ee ku aaddan kharashaadka ay ku isticmaalaan hawlaha doorashada. Masuuliyiinta aan waraysanayna, nooma suuro gelin inaan ka helno cadad sugan oo la xidhiidha lacagaha ay ku isticmaaleen hawlaha doorashada, hase ahaatee masuul waliba wuxuu nala wadaagay qiyaasta ugu macquulsan ee uu u malaynayo inay Xisbigiisa kaga baxday doorashada. Lacag ka badan $20 Milyan oo dollar ayaa celcelis ahaan ay masuuliyiintaasi sheegeen inay saddexda Xisbi ku isticmaaleen doorashadii madaxtinimada ee ugu dambaysay. Lacagtaas 96% waxaa isticmaalay laba xisbi oo keliya. ***Inkasta oo ilo ka madax-banaan Xisbiyadu ay sheegayaan in lacagtu intaas ka badan karto.***

c) **LACAGAHA KA YIMAADDA AMA AY ISTICMAALAAN REERAHA XISBIGA TAAGEERA**: Waxaa jira Guddiyo Qaran oo reeraha ah, kuwaas oo ka hareer dhisan Xisbiga, waxaana guddiyadaasi ay ururiyaan dhaqaale aad u badan, oo ay ku bixiyaan hawlaha guusha u keenaya Xisbiga. Xog sugan lagama hayo Xaddiga lacageed ee Guddiyada reeruhu u isticmaaleen Hawlihii Doorashada. Waxaase Xarunta CPA ay ilo

kala duwani u xaqiijiyeen in hawlihii kaadh-qaybinta ay Xisbiyada iyo Guddiyada reeruhu u isticmaaleen $8 illaa $10 Milyan oo dollar.

d) **TAAGEERAYAASHA XISBIGA IYO QURBE-JOOGTA:** Waxaa jira Guddiyo heerkoodu hooseeyo oo ka dhisan degmooyinka, oo dhaqaale ka hela qurbe-joog kuwaas oo iyana hela lacago kala duwan, isla markaana kharash badan bixiya iyaga oo taageeraya Xisbi ay isku hayb yihiin. Guddiyadaas laftooda xog badan lagama hayo lacagaha ay isticmaaleen.

Xog-ururinta ay samaysay xarunta CPA waxaa uga soo baxday in lacag ka badan $54 Milyan oo dollar inay ku baxday doorashadii madaxtinimada ee qabsoontay bishii November 2017. Qiyaastaas oo aan ka samaynay, xogaha aan ka helnay dadka aan sida tooska ah u waraysay, oo isugu jirta

- Qiyaas laga bixiyey lacagaha ku baxay gaadiidka lagu raray taageerayaasha, ama lacago ay taageerayaasha xisbiyada ku bixiyeen guddiyada reeruhu,
- Lacagaha sida tooska ah ugu baxay hannaanka doorashada oo ay bixiyeen Xukuumadda Somaliland iyo Qaadhaan-bixiyayaashu.
- Qiyaasta lacagaha ay Xisbiyadu u isticmaaleen hawlaha doorashadii madaxtinimada iyo ololihii doorashada ee ay galeen.

Hase ahaatee xogo ka madax-banaan dadka aan waraysanay ayaa CPA u sheegay in lacag intaas ka badani inay ku baxday Diiwangelintii codbixiyayaasha iyo Doorashadii ka dambaysay, waxaase adag in la helo hab sugan oo lagu mala'awaali karo tirada rasmiga ah ee lacagta ku baxday doorashada madaxtinimada ee Somaliland, waana mid u furan cid kasta oo doonaysa inay halkaas ka sii amba-qaaddo xog ururintan, si loo ogaado tirada rasmiga ah.



1.2 **MEELEHEE UGU BADAN OO XISBIYADU LACAGAHA KA HELAAN:**

Dadka aan ku waraysanay xog ururintan ayaa 85% isku raacay in Xisbiyadu ay lacagaha ka helaan Ganacsatada, Qaadhaanka Qabiilka iyo Qurbe-joogta. Sababaha lacagaha loo siiyo Xisbiyada ayaa 69% dadkii aan waraysanay waxay isku raaceen inay tahay, hab-qabiil ama dano gaar ah oo dadka lacagaha bixinayaa ay ka leeyihiin Xisbiyada, sida Ganacsatada oo kale. Halka 31% ay ku doodeen in lacagaha loo siiyo Xisbiyada, hab Xisbinimo ama in cidda xisbiga lacagta siinaysaa ay ku qanacday barnaamijkiisa.

1.3 HANNAANKA MAALIYADDA EE XISBIYADA

Daraasaddani waxay si gaar ah u eegtay hannaanka maaliyadda ee Xisbiyada, iyo inay Xisbiyadu leeyihiin hab ay u raacaan bixinta lacagaha soo gala, waxaa dadkii aan waraysanay ay u bateen inaanay jirin siyaasad iyo hab muuqda oo Xisbiyadu u raacaan maaliyadda, marka laga reebo lacagaha kabka ah (Miisaaniyadda Dawladdu siiso xisbiyada) ee ka soo gala dawladda oo badankeedu ku baxa kirada xafiisyada, taas oo xisbiyada qaarkood ay lacagahaas maamulaan agaasiyaasha xarunta dhexe. Lacagaha kale ee Xisbiga soo gala waxaa maamula Guddoomiyaha/musharaxa iyo guddiyo kale oo xisbiga la shaqeeya.

1.4 SAAMAYNTA LACAGUHU KU YEESHEEN NATIIJADII CODBIXINTA:

Doorashadii madaxtinimada ee ugu dambaysay waxaa codeeyey 556,617 oo codbixiye, waxaana qiyaas ahaan xisbiyadu u isticmaaleen ololaha kasbashada codbixiyayaashaas lacag ka badan $20 Milyan oo dollar, halka illaa $10 Million loo isticmaalay hawlaha rarista codbixiyayaasha, sidoo kale waxaa qabsoomidda doorashada ku baxay illaa $24 Milyan oo dollar.

Dadka aan waraysannay oo aan weydiinay arrimaha ugu saamaynta badnaa doorashadii dhacday ee codbixiyaha hagayey, ayaa ku dooday in qabiilku ugu horreeyey, taas oo la arkayey in Musharaxiinta Xisbiyadu ay ku ololaynayeen.

Masuuliyiinta Xisbiyada iyo xubno kale oo daraasaddan lagu waraystay ayaan weydiinnay sida ay u arkaan saamaynta lacagtu ku yeelatay doorashadii Somaliland ka qabsoontay, waxaana masuuliyiinta aan waraysannay, 93% ka mid ahi ay isku raaceen in lacagtu ay saamayn ku lahayd doorashadii Somaliland ka qabsoontay.

Sababaha lacagtan loo siinayey shakhsiyaadkan oo aan weydiinay ayay ku jawaabeen inay ahayd, inay u badnaayeen saddex arrimood:

a) Qof siyaasi ah oo taageerayaal badan leh, isla markaana saamayn siyaasadeed leh, oo Xisbigu doonayo inuu kasbado
b) Siyaasi ama Oday dhaqameed reerkiisa saamayn ku leh, taas oo la doonayo in lagu kasbado codka reerkiisa.

c) Qof dano gaar ah lacagta loo siiyey, sida qof taageere Xisbiga u ah oo codsaday gaadhi in loo iibiyo, ama oday dhaqameed lacag caddaan ah loo siiyo marti-soor si ay Xisbiga ugu shaqeeyaan iwm.

Dhammaan arrimahaas waxaa ujeedadooda koowaad ay ahayd si ay u helaan codka dadka ay metelaan, hababka lacagta loo siinayey codbixiyaha si codkiisa loo bedelo waxaa ka mid ahayd

1. Lacag toos loo siinayey codbixiyaha
2. Lacago la siinayey odayaal dhaqameed ama shakhsiyaad saamayn ku leh codbixiyaha
3. Lacago lagu bixinayey baahi deegaanka ka jirta, sida in loo ballanqaado in loo dhisayo Xarun Caafimaad, Waddo, Iskuul iwm. Taas bedelkeedana ay dadka deegaanku codka siiyaan musharaxa ay wataan cidda lacagtaas bixisay.
4. Deeqo loo qaybinayey dadka baahan, taas oo lagaga bedelanayey inay codkooda siiyaan Xisbiyada

Hababkaasi waxay ka mid yihiin, siyaabaha ay lacaguhu saamaynta ugu yeesheen codbixiyayaasha, taas oo keenaysay in codbixiyuhu aanu xisbiga ku dooranin barnaamijka uu wato hase ahaatee uu ku dooranayey danaha ka dhexeeya isaga iyo Xisbiga, ha ahaato dan dhaqaale, dan qabiil, dan siyaasadeed iwm.

1.5 MA JIRAAN IN XISBIYADU AY LACAGO KA HELEEN WADAMO DEBEDDA AH:

Qodobkan ayaa aad uga dhex muuqday ololihii doorashada, waxaa Xisbiyadu ay si weyn isugu eedaynayeen in lacago ka soo galeen wadamada debedda. Masuuliyiinta aan waraysannay ayaan weydiinay inay aaminsan yihiin inay jiraan lacago Xisbiyada ka soo galay wadamo/shirkado debedda ah, dadka aan waraysannay ayaa 60% waxay ku doodeen inay aaminsan yihiin in lacago ka doorashada ka soo galeen wadamo debedda ah. Dadka aan waraysanay oo aan weydiinno inay tilmaami karaan cidda ay u tuhmayaan in Xisbiyadu ka heleen lacagaha ayaa 60% waxay sheegeen inaanay farta ku fiiqi Karin, halka 40% ay xuseen magacyada dalalka Turkiga, Djibouti, Somalia, Imaaraadka Carabta iyo Qadar. Hase ahaatee xarunta CPA marna ma arag caddayn cad oo muujinaysa in dalalkaasi ay lacago ku bixiyeen doorashada Somaliland sidoo kale masuuliyiinta xisbiyada oo qaarkood darajadoodu aad u sarrayso, namay tusin caddayn ama markhaati muuqda.

1.6 XAKAMAYNTA LACAGAHA KU BAXA OLOLAHA DOORASHADA.

Inkasta oo ay jiraan dareeno la xidhiidha in lacago ay ka soo galeen doorashada Somaliland, wadamo dano kala duwan ka leh, haddana waxaa xusid mudan inaanay jirin siyaasado ama shuruuc ad-adag oo Somaliland uga yaalla xakamaynta in lacago ka soo galaan dalal debedeed. Waxaana haatan sahlan in si fudud dalkii doonaa u taageeri karo Xisbiga uu rabo.

Daraasaddani waxay weydiisay dhinacyada ay waraysatay, sida ay u arkaan in la sameeyo xeerar iyo shuruuc lagu xakamaynayo in lacago ay doorashada Somaliland ka soo galaan wadamada debedda, masuuliyiintii la waraytay waxay 90% isku raaceen inaymuhiim tahay in xeerarkaas la sameeyo.

Dhinacyada ay daraasaddu waraysatay ayaa isku raacay in shuruucda haatan jiraa inay yihiin kuwo aan si adag u hor istaagi Karin, in lacago ay ka soo galaan Xisbiyada, wadamo debedda ah iyo in lacaguhu ay saameeyaan doorashada. Hase ahaatee Xisbiyada qaarkood ayaa walaac ka muujiyey, inay adkaan karto in la dhaqan geliyo xeer kasta oo loo soo saaro in lagu xakameeyo lacagaha Xisbiyadu u isticmaalaan xilliga ololaha doorashada, iyada oo ay ugu wacan tahay,

a) Lacagaha ay Xisbiyadu ku shaqeeyaan oo ay bixiyaan Qabaa'il ama reeraha Xisbiga taageera, halkii ay ka ahayd inay xubnaha ururku bixiyaan dhaqaalaha xisbigu ku shaqeeyo, waxaana lacagaha ay reeruhu bixiyaan marar kala duwan, ay hoggaanka Xisbiga u soo gaadhaan hab caddaan ah (Cash), taas oo marar kala duwan lagu shubo xisaab gaar ah oo uu maamulo Musharaxa Xisbiga ama Guddiyada reeruhu.
b) Ganacsatada lacagaha siiya Xisbiyada oo aan doonayn in la ogaado qadarka lacageed ee ay Xisbigaas siiyeen, waxayna ka cabsi qabaan, haddii Xisbigaasi guuldaraysto, in Xisbiga guulaystaa uu ka aarsado, taasina waxay keentaa in ganacsatadu ay lacagaha si hoose u bixiyaan, lacagtaas oo aan si furan uga muuqanin marnaba xisaabaadka Xisbiga.
c) Kalsoonida lagu qabi karo cidda qaadaysa masuuliyadda dhaqangelinta xeerka, waxaana hoggaamiyayaasha mucaaradka qaarkood ay ku doodeen in, marar kala duwan ay xukuumaduhu ka tallaabsadaan xeer kasta oo xaddidaya lacagaha la siiyo Xisbiyada gaar ahaan xisbiga talada haya, waxayna ku eedeeyeen xukuumadda inay hantida dawladda ku taageerto xisbiga dawladda, isla arrintan oo aan weydiiyey masuul sare oo ka tirsanaa Xukuumaddii Xilka wareejisay ee Kulmiye ayaa beeniyey, wuxuuna sheegay, in lixdii bilood ee ka horreeyey doorashadii madaxtinimada, inaan marna Xukuumaddii uu ka tirsanaa aanay Xisbiga Kulmiye u fidinin wax taageero dhaqaale ah.

Masuuliyiinta la waraystay ayaa 20% waxay ku doodeen inay tahay arrin u taal Xisbiga dhexdiisa, haddii ay debedda ka timaaddona ay u muuqanayso Xakamayn Dhaqaale oo Xisbiyada lagu soo rogayo. Hase ahaatee dadka aan waraysanay ee isugu jiray Masuuliyiinta Sarsare ee Xisbiyada, Xukuumaddii hore, iyo Xubno ka mida bulshada rayidka ah, ayaa isku raacay 100% in loo baahan yahay in Xisbiyadu ay si daahfuran u soo bandhigaan dhaqaalaha ay ku isticmaalaan doorashada.

Waxaa jira Qodobka 23aad ee Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda ee Xeer Lr 14/2011, oo Xisbiyada ku waajibinaya inay Guddida Doorashada sannad walba 31-ka March inay u gudbiyaan Xisaab Xidh uu Audit soo hubiyey; Hoggaamiyayaasha Xisbiyada ee aan waraysanay ayaan weydiinay inay ka warhayaan inuu jiro qodobkan ku jira Xeer No. 14, waxaana 57% ay ku jawaabeen inaanay ka warhaynin, isla markaana inaaan guddida doorashadu iyaga weydiinin, 17% ayaa sheegay inay ka warhayaan, hase ahaatee waxay kalsooni darro ka

muujiyeen Xeer No.:14 oo ay ku sheegeen inuu yahay xeer aan wanaagsanayn, sidoo kale waxay ku doodeen inaanay habboonayn in maaliyadda Xisbiga in loo gudbiyo cid ka baxsan Xisbiga.

Su'aal kale oo aan weydiinay hoggaamiyayaasha Xisbiyada ee aan waraysanay ayaa ahayd, inay diyaar u yihiin inay sannadkan u gudbiyaan guddida doorashada, xisaab celintooda maaliyadeed, hase ahaatee 50% ayaa ku dooday inay Xisbiga u taallo, halka 50% kalena ay sheegeen inaanay haatan sheegi Karin.

1.7 MAXAA KEENA IN XISBIYADA AWOODOODU KU URURTO DAD GAAR AH:

Dad badan ayaa ku eedeeya Xisbiyada Somaliland inay reero yeesheen, ama dad gaar ah gacanta u galeen, hase ahaatee marka hoos loo eego waxaa jira duruufo sidaasi kellifaya, Masuuliyiinta aan waraysanay oo ay ku jiraan musharaxiinta Xisbiyada oo aan weydiinay sababta keenaysa in Xisbiyada loo arko kuwo reero leeyihiin ayaa sheegay inay ugu wacan tahay sababahan hoos ku xusan:

a) Xisbiga waxaa maamuli kara oo keliya cidda bixisa dhaqaalaha uu ku soconayo, waxaana caadi ahaan Xisbiyadu ay dhaqaalaha ka helaan xubnaha ururka (Membership Fee). Somaliland dadka xisbiyada taageera ayaa u badan dad aan dhaqaale haysan hase ahaatee marar badan dhaqaale u raadsada Xisbiga, maadaama shaqo la'aan baahsani jirto, taasi waxay keentaa in reerka uu ka soo jeedo musharaxa Xisbigu inay bixiyaan dhaqaalaha ugu badan ee Xisbiga, sidaasna ay awood ugu yeeshaan Xisbigii.
b) Xisbiyada oo aan xukuumadda ka helin dhaqaale ku filan, waxaana bishii Xukuumaddu ay siisaa 100 Milyan oo Somaliland Shilin ah oo u dhiganta ($10,000), lacagtaas oo aan ku filnayn kiradii xafiisyada iyo shaqaalaha xafiiska.
c) Xisbiyada oo aan lahayn siyaasad ay ku ursursadaan dhaqaalaha xubnaha Xisbiga (Membership Fee Strategy) ama hab ay kor ugu qaadi karaan.
d) Dhaqaalaha soo gala xisbiga oo badankiisu aan marin hannaanka maaliyadda ee Xisbiga, hase ahaatee ay maamulaan Guddiyo reereed, kuwaas oo noqday awood ka dhinac dhisan Xisbiga.

Arrimahaasi waxay ka mid ahaayeen qaar ka mida doodaha masuuliyiinta aan daraasadda ku waraysannay.

NATIIJO:

a) Waxaa ka soo baxday xog ururinta aan samaynay, inaanay Xisbiyadu marna u gudbin guddida doorashada ee Somaliland, xisaab-xidhkooda, sida uu waajibinayo qodobka 23aad ee Xeer No. 14 kaas oo Xisbiyada faraya inay sannad walba bisha March 31-keeda u gudbiyaan guddida doorashada Xisaab-xidh uu hubiyey hanti-dhawre madax banaan. CPA waxay ogaatay inaan weligeed la dhaqan gelin amarka ku qoran xeerkan.

b) Waxaa daraasaddan nooga soo baxday, inaan xog badan laga haynin lacagaha kaga baxa Somaliland dhinaca hawlaha doorashooyinka, gaar ahaan ololayaasha Xisbiyada iyo u diyaargarawga Xisbiyada ee doorashooyinka. Sababaha ugu weyn ayaana ah, iyada oo dhinacyo kala duwani saamayn ku leeyihiin hawlaha doorashada, sida qabaa'ilka, qurbe-joogta, ganacsatada iwm.

c) Daraasaddan waxaan ku ogaanay in lacago aad ugu badani inay ku baxaan ololaha doorashada, gaar ahaan isu-soo baxyada, waxaana masuuliyiinta badankoodu ay isku raacsanaayeen in

    a. Ololayaasha la isu soo saarayo dad aad u badani inay leeyihiin khatar amni oo joogto ah
    b. Isu-soo baxyada ay xisbiyada kaga baxaan lacago aad u tiro badan oo xisbigu u adeegsan lahaa hawlo kale
    c. Isu-soo baxu aanu wax badan ka bedelin ra'yiga codbixiyaha, hase ahaatee ay u tahay oo keliya niyad dhis, isla markaana ay dhacdo marar badan inaan dadka ka soo qayb galay kulanku inaanay aad u dhegeysanba khudbadaha masuuliyiinta.

    Sidaas awgeed waxaan ku talinaynaa in laga fikiro hab-midaysan oo fariimaha loogu gudbinayo codbixiyayaasha, isla markaana aan culays dhaqaale ku noqonayn xisbiyada, xukuumaddana ku keenayn culays amni.

d) Waxaan ku ogaanay daraasaddan, isku xidhnaan la'aan ka dhex jirta hay'adaha caalamiga ah eek a shaqeeya doorashooyinka Somaliland iyo guddida doorashada gaar ahaan, dhinaca maamulka maaliyadda ku baxda doorashada. Waxaan ogaanay in hay'adaha caalamiga ah oo raacaya hannaanka u degsan inay si madax-banaan u maamulaan lacagaha uga yimaadda qaadhaan bixiyayaasha. Waxaana habboon in la sameeyo hab midaysan oo si wada-jira loogu maamulayo dhaqaalaha doorashada, taas oo abuuraysa lahaansho (ownership) iyo in khibraddu ay ku hadho gudaha dalka.

e) Waxaa soo baxday inay jiraan tuhunno isa-soo taraya oo la xidhiidha in dalal shisheeye/shirkado inay soo faro-geliyeen doorashada Somaliland.

f) Waxaa noosoo baxday in Xubnaha Xisbiyadu aanay badankoodu bixin qaadhaankii xubinnimada ee ay ahayd inay bixiyaan, taas oo ay marar badan ugu wacan tahay in dadka ugu badan ee Xisbiyada taageeraa inaanay shaqaynin ama dhaqaale haysanin, taas bedelkeeda waxaa kharashiyaadka xisbiga intiisa ugu badan bixiya reero/ganacsato xidhiidh dhow la leh musharaxa xisbiga.

TALO SOO JEEDIN:

1. Haddii la doonayo in Dimoqraadiyadi ka dhex-dhalato Xisbiyada dhexdooda, waxaa habboon inay helaan Xisbiyadu dhaqaale ka madax banaan kan reerka musharaxa, si talada xisbigu aanay ugu afduubnaan oo keliya hadba reerka ay ka soo jeedaan hoggaanka sare ee Xisbigu, waxaana taas lagaga bixi karaa,
    a. In Xubnaha Xisbiyadu ay si joogto ah u bixiyaan qaadka xubinimada Xisbiga.
    b. In Miisaaniyadda Dawladda loogu daro lacag ku filan, hawlaha Xisbiga, si Xisbigu u dhismo
    c. In ganacsatada aan lagu ciqaabin, haddii loo arko inay lacag siiyeen Xisbi Mucaarad ah, iyaga oo raacaya sifo sharci ah, waxaa taasi keenaysaa in ganacsaduhu uu ka baqo inuu lacag siiyo Xisbi uu taageersan yahay, hase ahaatee waa inuu jiraa xeer arrintaas lagu maamulayo.
    d. In la xadido lacagta qof caadi ahi ugu deeqi karo Xisbi, ama shirkad ganacsi ay xisbi ugu deeqi karto, ama lacagta xisbi ka heli karo waddan debedeed. Isla markaana in saddexda xisbi ka heshiiyaan tallaabada laga qaadayo xisbiga ama masuulka ay ku caddaato inuu sharcigaas baalmaray
2. In la adkeeyo shuruucda xakamaynaysa, lacagaha debedda ka soo gelaya hannaanka doorashada, taas oo weecin karta hannaanka dimoqraadiyadda, isla markaana dalka u horseedi karta inay si sahlan u soo faro-gelin karaan wadamada danaha ka lihi.
3. Waxaa habboon in Xisbiyadu ay la yimaadaan daahfurnaan maaliyadeed, sida uu dhigayo, qodobka 23aad ee Xeer No: 14, kaas oo Xisbiyada ku waajibinaya inay sannad-kiiba hal mar u gudbiyaan guddida doorashada, xisaab celintooda, weliba wuxuu xeerku xaddidayaa wakhtiga ay tahay in la gudbiyo.
4. In la sameeyo guddi (Ama dib u habayn lagu sameeyo guddida diiwaangelinta ururada), oo ay heshiis ku yihiin Xisbiyada kala duwani, oo u xilsaaran fulinta hawlaha khuseeya Xisbiyada dhexdooda, sida, Cabashooyinka Xisbiyada ka dhex yimaadda, hubinta in Xisbigu raacayo xeer hoosaadkiisa, dusha kala socoshada inaan xisbiyada lacago ka soo gelin wadamo debedeed, hubinta in xisbiyada ay ka dhex jirto dimoqraadiyadi, hubinta inaan xukuumaddu taageero dawladnimo u fidin xisbiga dawladda xilliga doorashada iwm. Guddidani waa inay haysataa kalsoonida saddexda xisbi, waa inayna leedahay awood xooggan oo ay fulin ku samayn karto.
5. Si looga hortago in dad gaar ahi ay iibsadaan kaadhadhka codbixiyaha, ama qof khaldani ku codeeyo kaadhka codbixiyaha, ama haddii uu qofka ka lumo kaadhka codbixintu inuu weli heli karo fursadda uu ku dooranayo hoggaamiyaha metelaya, waxaan ku talinaynaa
    a. In goobaha codaynta, in la geeyo agab codayneed (KIT) ay ku kaydsan yihiin macluumaadka codbixiyayaasha goobtaas iska diiwaangeliyey, iyo agab fududaynaya hubinta codbixiyaha, sida qalabka indhaha sawira oo awood u leh inuu xaqiijiyo in qofkani yahay, codbixiyihii goobtan iska diiwaangeliyey, taasi

waxay meesha ka saaraysaa inay goobaha ka codeeyaan codbixiye aan ahayn kii ka diiwaangashanaa.

b. In marka uu mishiinku hubiyo codbixiyaha inuu markiiba fariin u diri karo xarunta dhexe ee Komishanka si loola socdo tirada ka codaynaysa goob walba, waxaana taasi sahlaysaa inaan hadhow muran ka iman tirada goobta ka codaysay.

6. Waxaa qabyo badani ka muuqataa xeerarka doorashada, ama xeerarka qaarkood ayaa Xisbiyada qayb ka mid ahi ay kalsooni darro ka muujiyeen, sida Xeerka ururada iyo Axsaabta ee Xeer No.14, kaas oo ah xeer muhiim u ah hawlaha Xisbiyada iyo in dhexdooda laga helo dimoqraadiyad iyo daahfurnaan maaliyadeed. Haddaba waxaa habboon in iyada oo lala tashanayo Xisbiyada in dib loo eego shuruucda la xidhiidha hawlaha doorashada.